MRSA

Horudhac

MRSA (oo mar-mar loogu yeero sida ‘cayayaanka xogga badan leh’) waa bakteriyada methicillin’ka adag ee Staphylococcus aureus. Waa bakteeriyo ka tirsan qooyska Staphyloccoccus aureus.

Staphylococcus aureus (SA) waa nooc caadi ah ee bakteeriyo. Qiyaastii 1kiiba 3 qofood ayaa ku sido jirka ama sankeena gudihiisa bakteriyada iyada oo aan ku bukan – kani waxaa lagu yaqaana in bakteriyada na “isticmaarey”. Laakin haddii bakteeriyada SA gudaha jirka ka gelo meel jeexan wuxuu inoo keeni karaa bukasho.

Waxaa loo isticmaalaa daawada antibiyootikada methicillin in lagu daaweeyo SA. Waxay bakteeriyada MRSA yahiin noocyada bakteeriyada SA oo u adkaystaan daawada methicillin-ka (iyo caadi ahaan antibiyootikooyinka kale ay loo isticmaalo in lagu daaweeyo bukashada SA).

MRSA gabi ahaan uma adkaysato antibiyootiko. Waxaa dhici karto inaad u qaadan doontid antibiyotiko waqti dheer, adigoo isticmaalayo qiyaas badan, ama aad qaadato antibiyootik kala duwan oo ay MRSA uu sidaas ugu adkaysan.

Calaamadaha

Waxay bakteeriyada staphylococcus (SA) yahiin kuwo caadi ahaan laga helo 1kiiba 3 qofood. Intooda badan kuwa jirkooda laga helo bakteriyada ma bukadaan sidaas darted ma laha wax calaamooyin lagu garto.

Laakin haddii bakteeriyada SA awood u lahaato inay gasho waxay sababi karaan calaamadaha bukashada ayadoo ku xiran nooca bukashada ay keeni karaan.

Badanaa bukashooyinka SA waxay yahiin bukashooyinka maqaarka ku dhaca, oo ay ku jiraan boogo, kasoobax, cellulitis iyo impetigo
Waa inaad isha ku haysid dhibaatooyinka yar-yar maqaarka sida finanka, meelaha jeex-jeexan ama meelaha gubtay. Haddii aad qabtid dhaawac bukadey waa inaad u tagtaa Takhtarkaaga Guud (GP).

Haddii ay bakteriyada SA awood u yeeshaan inay soo galaan dareerka dhiigga waxay waxyeelayn karaan dhinac kasto ee ka mid ah jirkaaga waxayna keenayaan bukasho aad u daran ay ku jiraan septicaemia (sumaynta dhiigga), bukashada lafta-dhuuxa, bukashada sambabta (pneumonia), iyo bukashada xididdada wadnaha (endocarditis).

Sababaha

Bukashoyinka MRSA caadi ahaan kuma dhacaan dadka caafimaadka qabo. Waxay intooda badan ku dhacaan dadka horay ugu jiray isbitaalka, sababta oo ah

 © Queen’s Printer and Controller of HMSO 2008

waxay qabaan meel ay ka soo galaan bakteeriyada jirkooda gudihiisa, sida dhaawaca qallinka ama tubada wax lagu siiyo xididdada yar-yar.
Waxay bakteeriyada MRSA caadi ahaan ugu faa-faan qof ka qof haddii qofka qabo bukashada MRSA la taabto. Waxay kale ku faafi karaan haddii laa taabto sheeyaal uu horay u soo taabtay qof qabay MRSA.

Waxaa ku jiraan kuwa aad halis ugu ah MRSA kuwa leh dhaawac furan, gubtay ama ku leh jirka dillaac, kuwa qabo cudur maqaar sida psoroasis, leh habka jir-iskacaabiyaha oo tabar-daran (sida waayeelka ama kuwa ku jiraan xaalad caafimaad oo ah sida kansarka), kuwa leh catheter ama duleelka cirbadaynta xididdada yar-yar, kuwa waqti dhow lagu sameeyay qalliin.

Inkasto oo ay bukashada MRSA ku dhacaan caadi ahaan kuwa lagu daaweeyo isbitaalka, waxaa suurto gal ah inay hawlwadeenada isbitaalka ama dadka soo booqanaayo ay bukadaan haddii ay ka mid yahiin mid ka mid ah kooxaha ugu jiro halista aad u sarayso.

Baaritaanka cudurka

Waxaa bukashooyinka MRSA lagu ogaadaa markii la baaro dhiigga, sambalka kaadida ama unug yar ee jirka laga soo qaado qaybta ku bukatey bakteeriyada MRSA. Haddii bakteeriyada MRSA laga helo, waxaa la samaynayaa baaritaanyo kale sidii loo fiiriyo antibiyootikada ay bakteeriyada u adkaysan karin, iyo midda lagu daawayn karo.

Waxay isbitaalo badan haatan ka baaraan qof kasto ee la soo jiifiyo MRSA, sidii loo arko haddii ay jirkooda ku qabaan MRSA. Sambal suuf lagu qadey ee maqaarka, sanka iyo kaadida yo dhiigga ayaa laga baarayaa bakteeriyada. Waxay qaadan kartaa 3-5 maalin natiijada si loogu laabto.

Haddii bakteriyada MRSA qabtid weli waa laguu oggolaanayaa in lagu jiifiyo isbitaalka, laakin waxay takhaatiirta ku siin karaan daawo si loo dhimo ama loo saaro bakteeriyada MRSA.

Daawaynta

Haddii ay kugu beermeen keliya bakteeriyada MRSA ma u baahnid wax daawayn ah, laakin inkastoo aad dad kale ku faafi kartid waa muhiim in lagaa saaro jirkaaga bakteriyada. Waxaa jirkaaga iyo sankaaga gudihiisa la marinayaa kareem gaar oo antibiyotiko ah si looga soo saaro bakteeriyada. Waxaa kale u baahanaysaa inaad ku dhaqdid jirkaaga iyo timahaaga shaambo iyo boomaato antiseptic ah.

Haddii aad qabtid bukashada MRSA waxaa lagu siinayaa antibiyootik oo weli si wax ku ool ah u dilo bakteriyada (tusaale ahaan, mid uu bakteeriyada weli u yeelan adkaysi). Waxaa inta badan bukashooyinka MRSA lagu daawayn karaa antibiyootikada vancomycin ama linezolid oo caadi ahaan lagu siiyo cirbadayn ama xididdada lagu shubo. Waxay badanaa bukashooyinka MRSA u baahan

 © Queen's Printer and Controller of HMSO 2008

yahiin daawaynta isbitaalka waxaana loo baahan karaa in la sii wado daawaynta antibiyootikada.

 © Queen's Printer and Controller of HMSO 2008

Ka hor-tagga

Haddii laguu soo qoro antibiyootiko waxaa muhiim ah inaad u dhammaysid sida laguugu soo qoray xittaa haddii aad bilaabdid inaad soo roonaatid.

Nadaafadda fiican waa sida ugu fiican ee lagu joojin karo inay MRSA faafaan. Markii aad meelaha jarmay aad iskaga daawaynaysid guriga, waxaa mar kasto dhaqdaa gacmahaaga waxaana iska hubisaa inay qaybaha oo dhan nadiif ahaadaan.

Haddii aad ku jirtid isbitaalka, waxaad iska hubisaa inay gacmahaaga iyo jirkaaga ahaadaan nadiif, dhaq gacmaha ka dib markii aad isticmaashid suuliga iyo ka hor cunto cunidda.
Waa inaad dhaqdaa gacmahaaga oo dhan ka hor iyo ka dib markii u qof kugu soo booqdo isbitaalka. Waxay isbitaalo badan bixiyaan daawooyinka gaarka ah ee antiseptic-waxaad ka heli kartaa meelaha ay yaalaan sariiraha bukaanlayda iyo halka laga soo galo qaybaha kiliinikada oo ay isticmaalaan halwadeenada iyo dadka ku imaanaayo booqashooyinka.

Ka hor iyo ka dib-ba xanaanaynta qof bukan, waa inay hawlwadeenada isbitaalka xaqiijiyaan inay gacmaha iska soo dhaqayn oo ay soo qalajiyeen Waa inay hawlwadeenada gashadaan gacmaha gacmi-gashi la tuuro markii ay la yeelanaayaan xiriir dhaawacyada furan. Haddii aad ka wel-welsan tahay nadaafadda, ha ka cabsan inaad waydiisid takhtarka ama kal-kaaliyaha ku daaweynaayo ama dadka ku soo booqanaayo inay soo dhaqdaan gacmahooda.

Adeeg turjubaan oo sir ah

NHS Direct wuxuu dhaqiiqado gudeheeda markaad soo wacdo ku heli karaa turjubaano luqado badan ku hadla oo si sir ah wax kugu turjimi doono.

Raac tusmadeena fudud ee seddaxda tallaabo:

Tallaabo 1 – Soo wac lambarka NHS Direct oo ah 0845 4647.

Tallaabo 2 – Markii waciddaada laga jawaabo, af Ingiriis ku sheeg luqada aad rabtid inaad isticmaashid. Ku sug khadka ilaa lagugu xiro turjubaan oo NHS Direct ku caawin doono inay ku siiyaan macluumaadka caafimaadka ama talada aad u baahan tahay.

Tallaabo 3 – Waxaad xitta saaxib ama qaraabo ka codsan kartaa inay adiga telefoon kuu soo diraan. Sug ilaa u turjubaanka soo galo khadka ka hor intii aadan sheegin sababta aad u soo wacdey.

 © Queen's Printer and Controller of HMSO 2008